

U qoondaynta faa'iido cunto oo deg-deg ah Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo

DSHS waxay soo saaraysaa faa'iidooyin cuntooyin kale oo dheeri ah iyadoo soo marinaysa EBT kaadhka ee inta badan qoysaska helo cuntada aasaasiga ah. Tani waxay bilaabantay Maarso iyo Paril 2020 waanay sii socon doontaa si bille ah.

Maxay tani u dhacaysaa?

Golaha Aqalka hoose wuxuu ogolaaday kaalmo dheeri ah si dadka loo siiyo awood ay ugu soo gataan cunto badan. Tani waxay yareeyn doontaa tirada inta jeer ee ay dadka u baahan yihiin inay soo adeegtaan raashin. Waxay sidoo kale xadidi doontaa tirada dadka dukaamada ku jira waxayna hoos udhigeysaa fursadda logu qaadi karo COVID-19.

Goormaan helayaa kaalmada dheeraadka ah?

Taariikhda soo saarida ee barnaamijka way kala duwanaan kartaa iyadoo ku xidhan ansixinta fadaraalka iyo hadii ay bisha kowdeedu noqoto Axad. Tani macnaheedu waa in ugu horaynta aad xuquuqaha heli karto bisha labadeeda.

Waxaan hadeer codsaday caawinta cuntada bishaan. Maheli doonaa kaalmo dheeraad ah?

Hadii aad ku haboon tahay xuquuqda caawimada cuntada ee ka badan \$0, waxaad heli doontaa xadiga xuquuqda ugu badan ee xajmiga qoyskaaga, ama, hadii ay xuquuqdaadu ka yar tahay \$95 ee tirada ugu badan, waxaad heli doontaa xuquuqdaadii oo lagu daray \$95.

Waa maxay tirada faa'idooyinka ugu badan?

Xubnaha reerka ee uqalma	kaalmada ugu badan
1	\$234
2	\$430
3	\$616
4	\$782
5	\$929
6	\$1,114
7	\$1,232
8	\$1,408
9	\$1,584
10	\$1,760
Mid kasta oo Dheeraad ah	+\$176

Waan u qalmaa cuntada aasaasiga ah, laakin ma helo wax xuquuq ah. Maheli doonaa kaalmo dheeraad ah?

Maya. Qoysaska u qalma \$0 uma qalmaan wax dheeri ah.

Waxaan helaa WASHCAP / caawimaada Cuntada Ku-meelgaarka / caawimada cuntada ee xuquuqda muhaajirka sharciga ah. Maheli doonaa kaalmo dheeraad ah?

Haa. Kaalmada dheeraadka ah waxay khuseysaa dhammaan barnaamijyada caawimaada cunada.

(Ku sii soco bogga xiga)



Waa meeqo kaalmada dheeraad ah ee aan heli doono?

Waxaad heli doontaa farqiga u dhaxeeya xuquuqdaada caadiga ah iyo xadiga ugu badan ee xajmiga qoyskaaga, ama \$95 hadii xuquuqdaada caadig u dhaxayso \$95 ee xaddiga ugu badan ee xajmiga qoyskaaga tusaale:

Tusaalaha 1:

Adiga iyo lammaanahaadaba waad shaqeysaan oo waxaad heshaan wadarta \$200 oo faa'idooyinka cuntada ee 10 ka Maajo. Qadarta ugu badan ee reer laba qof ah waa \$430. \$430 - \$200 waa \$230. Waxaad heli doontaa \$230 oo xuquuq dheeraada ah. Waxaad heli doontaa \$200 iyo \$230 dheeraad ah oo total ahaan ah \$430 ee taariikhdaada caadiga ah Maajo 10-keeda.

Tusaalaha 2:

Waxaad heshay badqabka bulshada, waxaanad helaysaa total dhan \$210 Maajo 17-keeda. Qadarta ugu badan ee reer hal qof ah waa \$234. \$234 - \$210 waa \$24. Mar hadii \$24 ay ka yar tahay \$95, waxaad heli doontaa xuquuq \$95 oo dheeraad ah. Waxaad heleysaa \$210 oo caadi ah iyo \$95 dheeraad ah oo wadarta \$305 ee taariiqdaada joogtada ah, Maajo 17.

Tusaale 3:

Adiga iyo labadaada ciyaalka ahi wax dakhli ah ma haysataan waxaanad heshaan wadar dhan \$616 oo xuquuq cunteed ah Maajo 13. Qadarta ugu badan ee reer saddex qof ah waa \$616. Maadaama aad heshayba xaddiga xuquuqda ugu badan ee xajmiga qoyskaaga, waxaad heli doontaa xuquuq \$95 oo dheeraad ah. Waxaad heleysaa \$616 oo caadi ah iyo \$95 dheeraad ah oo ah wadar \$711 ee taariiqdaada joogtada ah, Maajo 13.

Ma inaan dib u bixiyaa kaalmadaan?

Kuwani waa kaalmooyin dheeraad ah oo loogu talagalay isticmaalkaaga. Ma jirto sabab keenayso inaad dib u bixisid.

Miyaan luminayaa faa'idooyinka dheeraadka ah haddii aanan islamarkaas isticmaalin?

Maya. Waxaa lagu ogolyahay 365 maalmood ka bilow taariiqda ugu dambaysay ee howsha kaarkaaga si aad u isticmaashid faa'idooyinka dheeraadka ah oo joogtada ah.

kaalmooyinka dheeraadka ah miyey saameyn ku yeelan doonaan xaaladdayda soogalootinimada?

Maya.

DSHS miyay soo saari doontaa xuquuqo dheeraad ah bil kasta?

aDib ayaan u eegeynaa haddii aan ku siin karno xuquuqo dheeri ah oo xajmiga qoyskaaga ah oo bil ilaa bil ku salaysan iyadoo ay ku xidhan tahay ansixinta fadaraalka.

DSHS ma ii soo diri doontaa warqad markaan helo kaalmada dheeraadka ah? DSHS ma ii soo diri doontaa warqad hadii aanan ku haboonayn xuquuqo dheeri ah?

Maya. Ma direeyno waraaqo markaan bixinayno ama joojinayno xuquuqaha dheeraadka ah. Haddii aad rabto inaad ogaato goorta xuquuqdaada soo gaadhayso koontadaada, waxaad garaaci kartaa nambarka kaadhkaaga EBT si aad u hubiso hadhaagaaga ka isticmaal koontadaada xuquuqda macmiilka halkani www.washingtonconnection.org.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Miyaan wacaa Xarunta Xiriirka Adeega Macmilka?

Sababo laxiriiro tirada wacitaanada oo kabadan maalmaha caadiga ah, waxaan kaa codsaneynaa inaad u wicin xarunta wicitaanka wax ku saabsan kaalmada dheeraadka ah.

Hubi warbixinta ugu dambeyso oo akoonadeena warbaahinta bulshada ee [Faysbuug](#) iyo [Twitar](#) ama halkan www.dshs.wa.gov.